



Ilaali Xayawaankaaga Guriga

Ka fikir xayawaankaaga marka aad qorsheynaysid degdegga. Garo meesha aad geyn lahayd xayawaankaaga guriga marka ay jirto xaalad degdeg oo xusuuso baahiyadooda marka aad sameynaysid xidhmadaada diyaarsanaanta qoyska.

Ka hor masiibada

- Raadi meel ammaan ah oo ay joogaan xayawaankaaga guriga. Gaboodyada degdegga ee xayawaanka guriga, gaboodyada xakameynta xayawaanka, xarumaha caafimaadka xayawaanka ama saaxiibo iyo qaraabo ka baxsan dhibaataada ayaa dhammaan ah ikhtiyaaro suurtoagal ah. Waxa laga yaabaa in hoteelada iyo moteelada qaarkood ay kuu oggolaadaan inaad keentid xayawaanka guriga; waxana laga yaabaa in kuwo kale ay hakiyaan xeerka “lama oggola” xayawaan guri marka uu jiro degdeg. Hore u sii hubso inaad keeni kartid xayawaankaaga guriga.
- U hubso in xayawaankaaga guriga ay xidhan yihiin aqoonsi (ID) hadda ah wakhti kasta, iyo in sanduuqa qaadista ee xayawaan kasta uu ku qoran yahay macluumaad ku saabsan qofka lagala xidhiidhayo.
- U hubso in xayawaankaaga guriga ay u dhammeystiran yihiin tallaaladoodu. Waxa laga yaabaa in gaboodyada xayawaanka guriga ay rabaan cadeynta tallaalada.

Inta ay socoto masiibo

- Xayawaanka guriga ku hay guriga marka ay soo baxaan xaalado degdeg si aad u awoodid inaad heshid meesha ay joogaan.
- Ha sugin ilaa daqiiqada ugu dambaysa si aad isu diyaarisid. Waxa laga yaabaa in digniin la bixiyo saacado ama maalmo ka hor.
- Gaboodyada xayawaanka waxa boosaska ka banaan loo bixin doonaa xeer ah ugu horeeye ayaa loo hor adeegi doonaa. Hore u sii wac si aad u ogaatid helitaanka. Soo qaad alaabooyinka ku jira xidhmada alaabooyinka degdegga ee xayawaankaaga guriga.

Haddii aad qaxdid, qaado xayawaankaaga guriga

- Haddii aanay adiga ammaan kuu ahayn inaad joogtid aagga masiibada, ammaan uma ah xayawaankaaga guriga. Ha ka tagin xayawaankaaga oo ku jira gudaha guriga, iyada oo dibadda ku xidhan ama dibadda wareegaya. Si fudud ayay u dhaawacmi karaan, u lumi karaan ama loo dili karaa.
- Haddii aad baxdid, sii qaado xayawaankaaga xiitaa haddii aad u maleynaysid inaad awoodi doontid inaad soo noqoto gudaha dhawr saacadood oo kaliya.
- Goor hore bax — haddii aad sugtid amar qaxid ama bixid, waxa laga yaabaa in lagu sheego inaad ka tagtid xayawaankaaga.

Haddii aanad guriga ka bixin ama ka qaxin

- Xayawaankaaga guriga ku hay aag ammaan ah oo ah gurigaaga.

- Eyda ku hay hogaan bisadahana ku hay sanduuqa qaadista. U hubso inay xidhan yihiin aqoonsi.
- Hore u sii diyaari deris aamin ah oo qaada xayawaankaaga haddii aanad joogin guriga marka uu jiro degdeg. U hubso in qofkaasi uu raali ka yahay xayawaankaaga, uu garanayo meesha laga helo xayawaanka iyo alaabooyinkooda, oo uu haysto furaha gurigaaga.

Ka dib masiibada

- Ha oggolaan in xayawaanka guriga dibadda wareegaan. Xayawaanka guriga way lumi karaan haddii calaamadaha iyo urta ay yaqaaneen baaba’aan.
- Mudo ah dhawr maalmood, eyda ku hay hogaan bisaduhuna ha ku jiraan sanduuqa qaadista gudaha gurigaaga. Haddii gurigaaga uu burbur soo gaadhay, dibadda ayay u bixi karaan oo way lumi karaan.
- Sabir u yeelo xayawaankaaga guriga. Sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoagal ah u bilaw hawlaha caadooyin u ahaa. Diyaar u noqo dhibaatooyin dabeecadeed. Haddii dhibaatooyinku sii socdaan, ama haddii xayawaankaaga guriga uu qabo dhibaatooyin caafimaad, la hadal dhakhtarkaaga xayawaanka.

Liiska alaabooyinka degdegga ee xayawaanka guriga

Wax kasta diyaar ka dhig si loo sii qaato.

Alaabooyinka ku kaydi weel adag oo si fudud loo qaadi karo. Ku dar:

- Dawooyinka iyo diiwaanada caafimaadka oo ku kaydsan weel aan biyuhu galeynin, iyo xidhmo ah gargaarka koowaad.
- Xadhko hogaan ah iyo qoolal. Sanduuq qaadis oo ammaan ah oo weynaanta cabirkiisu u oggolaanayso xayawaankaaga guriga inuu si raaxo leh u sare joogsado, isu wareejiyo oo u jiifsado. Ku dar busteyaala ama shukumaano ama tuwaalo noqda gogol.
- Sawiro gargaar ka geysta in la garto xayawaanka guriga ee lumay oo lagu xaqiijiyo lahaanshaha.
- Cunto iyo biyo ah ugu yaraan todoba maalmood oo ah xayawaan guri oo kasta.
- Baaquliyo ama madiibado, waxyaabaha looga dhigo kaadida (cat litter), sanduuqa kaadida iyo qasac-fure gacanta ku shaqeeya.
- Macluumaad ku saabsan jadwalada quudinta, xaaladaha caafimaad, dhibaatooyinka dabaca, iyo magaca iyo lambarka dhakhtarkaaga xayawaanka.
- Sariiraha iyo alaabta ciyaarta ee xayawaanka guriga, haddii si fudud loo soo qaadi karo.
- Wargeyso ama jaraa’id, waraaqaha masaxaadda, bacaha qashinka, alaabooyinka nadaafadda iyo biliijta guriga.



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-
7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-011
Somali